Ilaahay ayaa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku

Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- isago dhahaya: "Ilaahay ayaa dhulka qabanaaya, samooyinkana midigtiisuu ku laa-laabayaa, ka dibna wuxuu dhahayaa: Anaa boqora ee aaway boqorradii dhulku."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- wuxuu sheegay inuu Ilaahay Maalinta Qiyaamah dhulka qaban doono iskuna ururin doono, samadana Midigtiisa ayuu ku laa-laabi doono, Samo walbana tan kale ayuu ku laabi doono, oo wuu baabi'in doono, wuxuuna dhihidoonaa: Anaa Boqora ee aawey Boqoradii Dhulku?!

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65028